WAAXDA CAAFIMAADKA IYO ADEEGYADA DUQOWDA [MISSOURI DEPARTMENT OF HEALTH AND SENIOR SERVICES] – ADEEGYADA NAFAQADA IYO HAWEENKA DHALLAANKA IYO CARUURTA [WIC AND NUTRITION SERVICES]

Xuquuqaha iyo Waajibaadyada Kaqeybqaataha - Somali

Dhaqangalaya 1da Fibraayo, 2019

Waan fahamsanahay inaan xaq u leeyahay inaan:

- ✓ Helo taageero iyo dhiirigelin ku aadan si aan uga qaybqaato adeegyada waxbarashada nafaqada, caafimaadka, iyo naas-nuujinta.
- ✓ Sinnaanta u qalmitaanka barnaamijka WIC iyo ka qayqaadashada heerarka, iyadoon loo eegayn, middab, asal qaran, da', curyaannimo, ama jinsi.
- ✓ Racfaan ka qaato go'aan kasta oo ay hay'adda WIC ka gaarto oo ku saabsan u qalmitaanka barnaamijka ama manfacyada WIC. Codsi Dacwad Caddaalad [Fair Hearing] aan 60 maalmood gudahood aan dirsan karo aniga oo la xiriirayo hay'adda WIC ee maxalliga ama barnaamijka WIC ee [the Missouri WIC program, P.O. Box 570, Jefferson City, MO 65102, (800) 392-8209.]

Waan fahamsanahay in anigu ay mas'uuliyad iga saaran tahay inaan:

- ✓ Hubiyo in aniga wakiildayda si sax ah aan u isticmaalno manfacyadeena WIC ee aan ku soo iibsano cuntada WIC ay ansaxiyeen oo dukaamada WIC ay ogoashahay sida aniga la iigu sharaxay inta ogolaanshahayga uu socday.
- ✓ Hay'addayda WIC aad la socodsiiyo haddii aan qorshaynayo in aan guuro si Shahaado Caddayn ah [Verification of Certification (VOC)] laga yaabo in la ii siiyo si aan horey ugu qaato goobta cusub si loo xaqiijiyo in barnaamijka WIC oo iigu sii socdo.
- ✓ Manfacyada WIC ka qaataa kaliya hal (1) hay'ad WIC markiiba maadaama laba meel ka qaadashadiisa ay sharci-darro tahay.
- ✓ Manfcayada WIC soo qaato goorta manfacyada ay diyaar yahay.
- ✓ Shaqaalaha WIC iyo shaqaalaha dukaanka aan kula dhaqmo si ixtiraam iyo edeb leh.

Iyada oo aan saxiixayga elektaroonigga ah aan ku saxiixayo nidaamka MOWINS, waxaan xaqiijinnayaa sida soo socota:

- ✓ Waxaa la iigula taliyay xuquuqdeyda iyo mas'uuliyadeyda sida hoos timaada barnaamijka WIC. Waxaan caddeynayaa in xogta iyo dukumeetiyada aan bixiyey ee ku saabsan qoyskeyga ay tahay mid sax ah.
- ✓ Waan fahansanahay in sarkaalka caafimaadka gobolka Missouri waxaa dhici karta inuu heshiis qoraal ah la galo si uu u oggolaado wadaagista ka qaybqaadashadayda barnaamijka WIC ee ujeeddooyinka WIC aan la xiriirin. Kan waxa kaliya isticmaali doona WIC iyo ururrada kale ee ku jira barnaamijyadan u adeegga shaqsiyaadka xaqa u leh ama u qalma barnaamijka WIC. Xogtan waxaa loo isticmaali karaa:
  - Go'aaminta u-qalmitaankayga barnaamijyada ururka uu maamulo;
  - Fulinta in la gaarsiiyo;
  - Inay ii fidiso xog ku saabsan barnaamijyada DHSS iyo in habka codsiga ay ka dhigto mid sahlan;
  - Inay wanaajiso caafimaadkeyga, waxbarashadeyda, ama fayo-dhowrkayga haddii aan horeyba aan isu diiwaangeliyey barnaamijyadooda; iyo
  - Inay cabbirto jawaab-celinta baahiyaha iyo natiijooyinka daryeelka caafimaadka.
- ✓ Waan fahansanahay in iibinta, ka ganacsiga, ama qof kale in aan siiyo manfacyada WIC, cuntada, tubooyinka naaska, ama caanaha ay tahay xadgudub oo ka qaybqaataha ku kacayo oo laga yaabo inay ku keento uruurinta iyo dalab dib u bixinta ama ka joojin ah barnaamijka WIC.
- ✓ Haddii dukumiintiyada oo dhan aan la heli karin marka dib u cusboonaysiinta la gaaro, waxaan afka ka caddaynayaa in dakhliga maqan, aqoonsiga, ama deganaanshaha ka soo baxay shuruuddaha xaq u yeelashada. Waxaan ku raacsan nahay inaan u soo bandhigo 30 maalmood gudahood si aan ugu sii jiro oo aan u helo manfacyada WIC. Xogta dib u cusoobaysiinta ayaa loo baahan yahay si loo helo kalamada federaalka ama dowladda dhexe. Cadeynta warbixintani waxaa loo sameeyey si loo helo adeegayada Dowlada dhexe.
- ✓ Waan fahamsanahay in been abuur ula kac ah ama qoraal khiyaamo ah ama u wakiilasho si ula kac ah oon ahayn run, qarin ama xaqiiqda oo la qariyo ay keeni karto in laanta WIC ee gobolka dib loogu celiyo wixii u dhigma ee ah faa'iidooyinka raashinka ee qalad ahaan la igu siiyey waxaa kale oo la igu qaadi karaa sharciga madaniga ah am ka danbiga ee hoos yimaada gobolka ama dawlada dhexe.

Sida uu qabo Sharciga xuquuqda madaniga ee dowladda dhexe iyo sharciyada iyo Qawaaniinta xuquuqda madaniga ee Wasaaradda Beeraha ee Dowladda Mareykanka [U.S. Department of Agriculture (USDA)], wakaaladaheeda, xafiisyadooda, shaqaalaha, iyo hay'adaha kaqeybgalaya ama maamula barnaamijyada USDA ayaa laga mamnuucay wax takoor ah oo ku salaysan jinsi, midab, asal qaran, jinsiga, naafo, da', ama aargoosi ama aar gudashada hawlaha xuquuqda madaniga ee barnaamij kasta ama waxqabadyo kasta oo ay fulisay ama ay maalgeliso USDA.

Dadka curyaamiinta ah ee ubaahan habka kale ee isgaarsiinta ee macluumaadka barnaamijka (tusaale ahaan Braille, daabacaad ballaaran, cod cajalad, Luqadda Tilmaanta ee Amerikaanka, iwm.), Waa inay la xiriiraan wakaaladda (gobolka ama degaanka) halkaasoo ay codsadeen macaashka. Shaqsiyaadka aan dhagaha wax ka maqli karin, dhib ka qaba maqalka, ama aan hadli karin waxay la soo xiriiri karaan USDA kalana xiriir Gudbinta Adeegyada Dowlada Dhexe ee (800) 877-8339. Waxaa intaa dheer, macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luqaddo kale oo aan Ingiriis ahayn.

Si aad u soo dirsato cabasho takoor ku aaddan barnaamijka, soo buuxi Foormka Cabashada Takoorta ee Barnaamijka USDA [USDA Program Discrimination Complaint Form] (AD-3027) oo laga helo qatka online-ka ee http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html, ama warqad u soo qoro adiga oo USDA ku soo hagaajinnaya oo warqadda ku soo qor dhammaan macluumaadka aad ku soo codsanaysid foormka. Si aad u soo codsato nuqul foomka cabashada ah, wac (866) 632-9992.

Foormkaaga oo dhammaystiran ama warqaddaada u soo gudbi USDA adiga oo ku soo dira:

1. Cinwaanka Boostada: U.S. Department of Agriculture, Office of the Assistant Secretary for Civil Rights, 1400 Independence Avenue, SW, Washington, D.C. 20250-9410;
2. Fakis: (202) 690-7442;
3. Iimeel: program.intake@usda. gov

Saxiixa Kaqaybtaaqaha/Daryeelaha*_____ **Taariikh _____**

* Foomkan uma baahna in la saxiixo marka lagu saxiixo qaabka elektarooniga ee MOWINS.